



George Harvey CI iyo York Memorial CI

Dib u eegista Hoyga Ardayga

Sahanka Jawaabcelinta

Marka ay ahayd Febraayo 5,2020, Guddiga Wakiiladu waxa uu meel mariyay Dib u eegista Hoyga Ardayga ee Wax laga Baddalay ee York Memorial CI iyo George Harvey CI. Ujeeddada sahankaan waa in lagu aruuriyo jawaabcelinta bulshada ee ku saabsan hababka la soo jeediyay. Jawaabcelinta la helo waxaa lagu dari doonaa warbixinta ugu danbaysa ee shaqaalaha, kaasoo loo soo bandhigi doono Guddiga Wakiillada si ay go'aan kama danbays ah u qaataan gudaha Juun 2020.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dib u eegistaan fadlan bookho: <https://www.tdsb.on.ca/About-Us/Strategy-Planning/Search-All-Reviews?id=163>

Waxaad iskaan-garayn kartaa kuna diri kartaa sahankaaga oo dhammaystiran accommodationreviews@tdsb.on.ca ama gayn kartaa isagoo warqad ah xafiiska shaqaalaha ee George Harvey CI ama York Memorial CI.

Su'aasha 1

Waa kee dugsiga bulshada aad ka tirsan tahay?

George Harvey CI

York Memorial CI

Ma khusayso

Su'aasha 2

Tee tafaasiisha ugu fiican kaa bixinaysa?

Arday TDSB ah

Waalid TDSB ah

Shaqaaale TDSB ah

Xubin bulshada kamid ah

Su'aasha 3

Waa maxay habka aad doorbidayso? (Fadlan sax saar hal sanduukh)

Habka 1 – Xaaladda Iminka – Aan la Isku Darin → Ardayda iyo shaqaalaha York Memorial CI waxay sii dagganaan doonaan goobta Scarlett Heights ilaa dib u dhiska York Memorial CI uu dhammaado. Ardayda George Harvey CI waxay sii joogi doonaan goobtooda.

Habka 2 – George Harvey iyo York Memorial oo la isku daro 2021 → Ardayda iyo shaqaalaha York Memorial CI waxa ay sii joogi doonaan goobta Scarlett Heights hal sannad dugsiyeed oo kale (2020-21). Gudaha 2021, waxay ku darsami doonaan ardayda iyo shaqaalaha George Harvey CI (waxay noqon doonaan hal dugsi) waxayna u guuri doonaan dhismaha George Harvey CI. Dugsiga isku darkooda ka kooban waxa uu u guuri doonaa goobta dib loo dhisay ee York Memorial CI gudaha 2026.

Habka 3 – George Harvey iyo York Memorial waxa ay iskugu darsamayaan 2026
Goobta Dib loo dhisay ee York Memorial CI → George Harvey CI iyo York Memorial CI waxa ay ku shaqayn doonaan laba goobood oo kala duwan waxayna hal dugsi isku noqon doonaan meesha dib loo dhisayo ee York Memorial CI 2026. Tani waxa ay la micno tahay in York Memorial CI uu sii wadi doono in uu ku shaqeeyo goobta Scarlett Heights ilaa dib u dhisku ka dhammaado.



Habka 4 – George Harvey iyo York Memorial waxa ay isku darsamayaan 2022 → Ardayda iyo shaqaalaha York Memorial CI waxa ay sii joogi doonaan goobta Scarlett Heights laba sannad dugsiyeed oo kale (2020-21 iyo 2021-22)). Gudaha 2022, waxay ku darsami doonaan ardayda iyo shaqaalaha George Harvey CI (waxay noqon doonaan hal dugsi) waxayna u guuri doonaan dhismaha George Harvey CI. Dugsiga isku darkooda ka kooban waxa uu u guuri doonaa goobta dib loo dhisay ee York Memorial CI gudaha 2026.



Habka 5 – George Harvey iyo York Memorial waxa ay iskugu darsamayaan 2026 ayaka oo Xarun ahaan u dagaya goobta dib loo dhisay ee York Memorial CI iyo Dhismaha George Harvey → George Harvey CI iyo York Memorial CI waxa ay ku shaqayn doonaan laba goobood oo kala duwan inta dib loo dhisayo goobta York Memorial CI 2026. Labada dugsi waxa ay isku darsami doonaan 2026 waxayna noqon doonaan hal dugsi. Dugsiga isku darka ka dhashay waxa uu daga doonaa goobta dib loo dhisay ee York Memorial CI iyo dhismaha George Harvey CI wuxuuna u shaqayn doonaa dugsi hal xarun leh -- hal dugsi oo hal jadwal leh, ayada oo ay isticmaalayaan labo dhisme (tusaale ardaydu waxay u kala socon doonaan labada dhisme dhexdooda).



Su'aasha 4

Maxay tahay sababta aad u dooranayso habkan?

Su'aasha 5

Ma haysaa wax soo jeedin ama faallo ah oo aad jeclaan lahayd in TDSB ay ka fikiraan?
